

Su'aalaha Inta Badan La iswaydiiyo (Frequently Asked Question, FAQ) ee ku saabsan Hubinta Taariikhda Waxbarashada Caruurnimada Hore

Yay tahay in lagu sameeyo hubinta taariikh ahaaneed?

Shakhsiyaadka u shaqeeya, si ikhtiyaari ah ugu shaqeeya, degan ama haysta helitaanka aan la ilaalinayn ee caruurta barashada hore ama goobta daryeelka ilmaha waa inay dhamaystiraan hubinta taariikhda.

Midan waxaa kamid ah shakhsiyaadka:

- Hadda haystaan cadaynta hubinta taariikheed oo rabaan inay cusbooneysiyaan ogolaanshaha.
- Raadinayaan ogolaanshaha hubinta taariikheed markii ugu horaysay.

Cadaynta hubinta taariikh ahaaneed waxay u ogolaataa shakhsiyaadka la hubiyay inay:

- Ka shaqeeyaan hay'adda daryeelka caruurta.
- Daryeelaan caruurta hela adeegyada waxbarashada caruurnimada hore.
- Dagaan dhismaha hay'ada daryeelka ilmaha ama xarun shahaado haysata.
- Ku daryeelaan caruurta guriga ilmaha ama daryeel bixiyaha, oo ay ku jiraan qoyska, saaxiibada, iyo deriska (Family, Friends, and Neighbors, FFN) ama daryeel bixiyayaasha guriga/qaraabada.
- U galitaanka aan la ilaalinayn ee caruurta helaya adeegyada waxbarashada caruurnimada hore, oo ay ku jiraan kuwa aan si toos ah u daryeelin caruurta laakiin ka shaqeeya ama si ikhtiyaari ah uga shaqeeya dhismaha.

Wixii macluumaad kale oo waxtar leh, fadlan booqo: <https://www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/background-checks>.

Maxaa kamid ah hubinta taariikh ahaaneed?

Hubinta taariikhda qaranka:

- Hubinta Taariikhda Dambiyada Faraha ee Qaranka ee Hay'ada Dambi-baarista Dawlada Dhexe (Federal Bureau of Investigation, FBI)
- Hubinta Diiwaanka Dambiilaha Galmada Qaranka ee Xarunta Macluumaadka Dambiyada ee Qaran (National Crime Information Center, NCIC)

Hubinta taariikhda gobal:

- Hubinta Taariikhda Dambiyada Faraha ee Gobolka



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

Taariikhda Hore: Oktoobar 2023 | Taariikhda Dib Loo eegay: Feebaraayo 2025

Waaxda Adeegyada Maamulka | Waxaa ogolaatay qaybinta Mariah Fabiani, Maamulaha Hubinta Taariikhda

- Hubinta Diiwaanka Dambiyada Galmada ee Gobolka Gudihisa
- Hubinta Diiwaanka Xadgudubka Ilmaha ee Gobolka Gudihisa iyo Dayacaada

Gobalka(ada) uu shakhsigu deganaa shantii sano ee la soo dhaafay:

- Hubinta Taariikhda Dambiyada ee Gobolada ka Dhexeeya
- Hubinta Diiwaanka Dambiyada Galmada ee Gobolada ka dhexeeya
- Hubinta Diwaanka Xad-gudubka Ilmaha iyo Dayacaadda ee Gobolada ee ka dhexeeya

Shuruudaha Hubinta Taariikhda ee Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha

(Department of Health and Human Services, DHHS) ee Deegda Daryeelka iyo Koriinka Ilmaha (Child Care & Development Block Grant, CCDBG) - wuxuu bixiyaa dulmar guud oo ku saabsan taariikhda ay hayso dawlada dhexe hubinta qaybaha iyo shuruudaha daryeelka ilmaha iyo codsadayasha waxbarashada caruurnimada hore.

Hubinta taariikh ahaaneed ayaa loo baahan yahay kahor shaqaalaysiinta iyo ugu yaraan shantii sanoba mar. Hubinta taariikhda waa inay buuxisaa heerka caadiga ah 45-maalmood ama ka yar wakhtiga kama dambaysta ah.

Waa kuwee goobaha waxbarashada caruurnimada hore ama daryeelka ilmaha ee ay shuruud u tahay hubinta taariikhda?

- Barnaamijyada waxbarashada caruurnimada hore ee guriga qoyska ee ruqsada leh
- Barnaamijyada waxbarashada caruurnimada hore ee xarunta daryeelka carruurta ee ruqsada leh
- Barnaamijyada da'da dugsiga gaaray ee ruqsada leh
- Dayeel bixiyayaasha ruqsada laga dhaafay ee guriga/qaraabada ah ee u qalma inay helaan Barnaamijka Daryeelka Ilmaha ee Dadka Dakhlioodu Hooseeyo (Working Connections Child Care, WCCC)
- Barnaamijyada Daryeelka Ilmaha ee ku Salaysan Goobaha Dabiiciga ah ee Banaanka ee ruqsada leh

Maxaa loo tixgaliyaa “u galitaanka aan la kormeerin”?

Sida waafaqsan Xeerka Maamulka Washington (Washington Administrative Code, WAC) 110-06-0020: "Galitaanka aan la kormeerin" waxaa lagu qeexaa "ma aha joogitaanka shakhsi ah oo shaqaale ka ah hay'ada daryeelka caruurta oo ay u oggolaatay DCYF inuu keliis la ahaado carruurta ka helaya adeegyada waxbarashada caruurnimada hore ee isla hay'adda. Ujeedooyinka qeexitaankan, galitaanka aan la kormeerin waxaa kamid ah, laakiin aan ku koobnayn, u alitaanka caruurta qaadanaysa adeegyada waxbarashada caruurnimada hore ee aan ku dhex jirin kala duwanaansho muuqaal ama maqal joogto ah ee shakhsiga ay u ogolaatay DCYF inay keligood la joogaan carruurta helaya adeegyada waxbarashada caruurnimada hore."

Haddii cadaynta hubinta taariikhda ee codsadaha la hakiyo baaritaan ay sameeyeen Adeegyada Ilaalinta Ilmaha (Child Protective Services, CPS) ama Waaxda Ruqsad Bixinta (Licensing Division, LD), miyay weli shaqayn karaan, si ikhtiyaari ah uga shaqayn karaan, ku noolan karaan guriga ama ma la yeelan karaan u galitaanka aan la kormeerin carruurta ku jirta waxbarashada caruurnimada hore ama barnaamijka daryeelka ilmaha?

Maya. hubinta taariikheed oo la hakiyey waxay ka dhigan tahay in caddayntoodu aanay shaqaynayn ilaa natiijada baaritaanka ama qiimaynta ku haboonaanta. Tani waa run xitaa haddii qofka hore loo hubiyay.

Miyaa martida guriga habeen soo seexda u baahan yihiin Qubinta Taariikh ahaaneed ee la Qaadan karo (Portable Background Check, PBC) ee la cadeeyay? Haddii ay sidaas tahay, waa maxay mudada joogitaanka ee keeni karta baahida PBC?

Haa, haddii ay u gali doonaan ayaga oo la kormeerin ah daryeelka caruurta ku jirta waxbarashada hore.

Codsaduhu ma bilaabi karaa isla markaaba, oo ma shaqayn karaa iyada oo la kormeerayo ilaa ay ka cadaynaayan baaritaanka taariikh ahaaneed?

Qaaditaanka sawirada faraha waa in la dhamaystiraa kahor inta aan shaqada la bilaabin. Shaqaale kasta oo cusub oo daryeelka ilmaha ah, codsade, ama mid si ikhtiyaari ah uga shaqeeya ayaa laga yaabaa inay ku sugnaadaan goobta haddii aanay ku jirin booska daryeelka ilmaha ee ruqsada leh oo aan lagu tirin saamiga, aan la macaamilin ama aan la kormeerin caruurta. Tan waxaa kamid ah waraysiyo, tababaro, iyo shaqaalaysiin shaqaale cusub. Tan waxaa sidoo kale kamid ah shakhsiyaadka ku hawlan kormeerida fasalka iyada oo qayb ka ah habka waraysiga, iyo shakhsiga la waraystay looma tixgeliyo shaqaale ama shaqaalaysiin.

Sidee ayuu codsadaha waxbarashada caruurnimada hore u codsadaa Hubinta Taariikhda La Qaadan karo (PBC)?

Codsadayaashu waa inay booqdaan lifaaqa soo socda si ay u helaan tilmaamo oo ay u samaystaan koonto Aalada Waxbarashada iyo Diwaanka Macluumaadka ee La Maamulo (Managed Education and Registry Information Tool, MERIT), kaas oo looga baahan yahay buuxinta codsiga PBC: [Diiwaanka Shaqaalaha MERIT | Waaxda Caruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska ee Gobolka Washington](#).

Daryeel Bixiyayaasha Shabakadda Qoyska iyo Saaxiibada (Friends and Family Network, FFN) waa inay booqdaan lifaaqa soo socda: [Daryeel bixiyayaasha Qoyska, Saaxiibada, iyo Deriska | Waaxda Caruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska ee Gobolka Washington](#).

Sidee ayuu codsaduhu u cusbooneysiistaa PBC?

Hubinta taariikh ahaaneed waa in la cusboonaysiiyaa shantii sanoba mar. Hubin cusub ee faraha waa in la dhamaystiraa wakhtiga cusboonaysiinta codsade horaan faraha looga qaaday iyo codsadayaasha aan faraha laga qaadin.

Codsadayaashu waxay heli doonaan ogaysiis ah in la gaaray wakhtigii dib loo cusboonaysiin lahaa PBC iyaga oo raacaya tilmaamahan soo socda:

1. Gal barta merit.dcyf.wa.gov.
2. Riix badhanka “Codsiga (My Applications)”.
3. Riix lifaaqa buluuga ah ee ku astaysan “Codsiga Hubinta Taariikhda La Qaadan Karo (Portable Background Check Application)”.
4. Buuxi oo soo gudbi codsiga.

Sidee ayuu codsaduhu u sixi karaa macluumaadka shaqada ee codsiga PBC?


Tani wax saamayn ah kuma laha PBC, laakiin codsaduhu wuxuu rabi doonaa inuu xaqiijiyo in shaqadoodu hada tahay mid sax ah oo ku jirta Diiwaanka Xirfadeed ee MERIT.

Sidee ayuu codsaduhu ugu daraa ciwaanka deegaanka ee hada uu dagan yahay codsiga PBC ee Talaabada 3?

Marka lagu daro macluumaadka ciwaanka deegaanka ee talaabada 3 ee codsiga PBC, codsaduhu waa inuu muujiyaa ciwaanka deegaanka ee hada uu dagan yahay isaga oo dooranaya sanduuqa ku calaamadsan “Sax sanduuqa haddii kani yahay ciwaankaaga deegaanka ee hada (Check box if this is your current address).” Haddii sanduuqan aan la sixin, codsaduhu ma awoodi doono inuu sii wado.

Sidee ayuu codsaduhu ugu dari karaa macluumaadka aqoonsiga haddii uusan aqoonsiga gobalka?

Codsiga PBC, haddii codsaduhu aanu isticmaalayn Ruqsad ama Aqoonsiga Gobolka, riix "Nooca Aqoonsiga Dawlada ee Aan dhicin (Non-Expired Gov ID Type)" ee liistada hoos u dhaadhaca oo dooro ikhtiyaarka “Midna (None)”:



Government Issued ID (Example: Driver's License, Passport, etc.)

Non-Expired Gov ID Type

None

Washington License or State ID

Out of State License or State ID

None

State

Please Select

Sidee ayuu codsaduhu u daabacan karaa nuqulka dhamaystirka cadaynta PBC?

1. Codsaduhu waa inuu ka galaa merit.dcyf.wa.gov.
2. Aad badhanka "Diwaankaya (My Record)".
3. Aad badhan hoosaadka "Diwaanka Xirfadeed (Professional Record)".
4. Raadi sanduuqa ku astaysan "Xogta Shakhsi ahaaneed (Personal Data)". Sanduuqa dhexdiisa, waxaad ku arki doontaa taariikhda dhalashadaada. Hoosta taariikhda dhalashadaada, waxaad ku arki doontaa Macluumaadkaaga Hubinta Taariikhda ee La Qaadan karo. Hoostaas, waxaad ku arki doontaa lifaaq buluuga ah ee ku suntan "Riix halkan si aad u aragto una daabacdo Shahaadada Hubinta Taariikhda ee La Qaadan karo (Click here to view and print your Portable Background Check Certificate)". Fadlan ku dhufo lifaaqan oo waxaad awoodi doontaa inaad daabacdo shahaadadaada.

Maxaa ii diidi kara inaan ka shaqeeyo Waxbarashada Caruurnimada Hore?

Liistada buuxa, fadlan ka eeg [Liistada Xoghayaha ee Dambiyada iyo Talaabooyinka Xun ee Shagaalaha iyo Daryeel Bixiyeyaasha](#) kaas oo ay kamid yihiin:

- Diidmada ogolaanshaha hubinta taariikhda dembiga ama si bareer ah u samaynta bayaan been abuur ah oo la xiriira baaritaanka taariikhda dembi.
- Ka diiwangashan yahay, ama loo baahan yahay in laga diiwaangeliyo, diiwaanka dembiilaha galmada ee gobolka ama kaydka ama Diiwaanka Dembiilaha Galmada ee Qaranka.
- Xukunada dambiga ah ee ka kooban:
 - Dil
 - Ku xadgudubka ama dayaca ilmaha
 - Danbi ka dhan ah carruurta, oo ay ku jiraan sawirada qaawan
 - Xadgudubka qoyska
 - Dembi ku lug leh kufsi ama faraxumayn galmo
 - Afduub
 - Gubitaan
 - Xadgudub ama weerar jir ahaaneed
 - Dembi maandooriye la xiriira oo la galay shantii sano ee ka horaysay
- Xukunka fal dambiyeed rabshado wata oo uu gaystay qof weyn una gaystay ilmo, oo ay ku jiraan dambiyada soo socda: xadgudubka ilmaha, khatar ilmaha, iyo faraxumaynta, ama fal-dambiyeed kasta oo ku lug leh sawir qaawan ee caruurta.

Miyaa racfaan laga qaadan karaa diidmada?

Codsadayaasha aan u qalmin iyadoo lagu saleynayo dabeecadda, ku haboonaanta, iyo qiimaynta kartida waxay codsan karaan dib u eegis go'aanka iyagoo iimayl ku soo diraya DCYF.BackgroundCheck@dcyf.wa.gov. Haddii ay doorbidayaan inay rafcaan ka qaataan go'aanka, waxay sidaas samayn karaan iyagoo ku codsanaya rafcaan qoraal ah Xafiiska

Dhagaysiga Maamulka (Office of Administrative Hearings, OAH). **Hagitaano iyo tilmaamo faahfaahsan oo ku saabsan habka rafcaanka ayaa lagu dari doonaa warqada la xaqiijiyay ee loo diro codsadaayaasha aan u qalmin.**

Imisa jeer ayuu codsaduhu u baahan yahay in la sameeyo ka qaaditaanka faraha?

- Hubinta ka qaaditaanka faraha waa in la cusboonaysiiyaa shantii sanaba mar laga bilaabo taariikhda markii hore laga qaaday.
- Daryeel bixiyayaasha ka taga shaqada waxaa looga baahan yahay inay dhamaystiraan hubinta taariikhda cusub iyada oo aan loo eegin wakhtiga u dhexeeya kala-tagitaanka iyo dib u codsashada.
- Xubnaha shaqaalaha ee ka taga shaqaalaynta daryeel bixiyaha ilmaha ee gudaha gobolka 180 maalmood oo isku xigta.

Halkee ayaan ka heli karaa sharciyada dawlada dhexe iyo gobolka ee la xiriira?

- Shuruuraha dawlada dhexe ee [Xeerkii Deeqaha Daryeelka Caruurta iyo Horumarinta Daryeelka Caruurta](#) (CCDBG) ayaa lagu dhaqangaliyaa [Xeerkii Dib loo Eegay ee Washington \(Revised Code of Washington, RCW\) 43.216.270](#) and [WAC 110-06](#).
- [Shuruudaha Hubinta Taariikhda ee DHHS CCDBG](#) wuxuu bixiyaa dulmar waxtar leh oo ku saabsan hubinta taariikhda ee dawlada dhexe iyo shuruudaha daryeelka ilmaha iyo codsadaayaasha waxbarashada caruurnimada hore.

Haddii aan deganahay gobol kale oo aan hore ugu noolaa Washington, xagee ayaan ka codsadaa hubinta taariikhda dembiilaha, hubinta diiwaanka dembiilaha galmada iyo hubinta xadgudubka iyo dayaca ilmaha?

- Hubinta taariikhda dembi: [Websaytka Ilaalada Gobolka Washington](#).
- Hubinta Xadgudubka Dayacaada Ilmaha-talefoonka: 1-800-998-3898 - dooro hubinta taariikhda Xadgudubka iyo Dayaacadada Ilmaha (Child Abuse and Neglect, CAN) ee degdega ah ama iimaylka: CANhistorychecks@dcyf.wa.gov.
- Hubinta diiwaanka dembiilaha galmada: <https://www.nsopw.gov/>.